



Ku Laabashada Dugsiga 2021 – Waan Hirgalinay!

Sebtember 1, 2021

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Waan hirgalinay! Sanad iyo bar ka dib ilaa iyada oo ay dugsiyadeenu xirnaayeen taasina keentay in ardaydu waxabrashada guryaha ku qaataan, haddaba fasaladeenii mar labaad waxay noqonayaan xarumo si faraxda ku jirto waxbarashada dib lagu qaadanayo.

Waxaan mahad u celineynaa maamulayaasha dugsiyadeena iyo shaqaalaha ka soo shaqeynayey xilligii xaggaagii oo dhan sidii ay waqtigani u diyaarin ay dugsiyadu u noqon lahaayeen. Waana sababta ay inoogu suurtagashay in hoggaamintoodii darteed aan u soo dhaweyno arday walba iyo qoyska kasta tallaabooyinka lagu yareynayo inaanu ku faafin xanuunka COVID dugsiyadeena.

Waxaan u mahadcelineynaa macallimiinteena oo, dhoolacaddeyn iyo niyadsami aad u sarreysa, ku soo dhaweynaya caruurteena fasalada waxbarashadooda. Habeen hore, waxaan heshiis hor dhac ah la gaarnay Ururada Macallimiinta Portland (PAT) oo ku saabsan tallaabooyinka lagu ilaalinayo caafimaadka iyo nabadgelyada ee aan u dejinay sidii aan u yareyn lahayn faafitaanka cudurka COVID-19. Waxaan ku sharaxnay tallaabooyinka nabadgelyada iyo caafimaadka ee Hagaha Qoyska Ku Soo Laabashada Dugsiga 2021. Tallaabooyinka waxaa ka mid ah:

- Waxaa looga baahan yahay ardayda iyo shaqaaluhu inay xirtaan maaskarada (af-saabka);
- Inay ardaydu isku jirsadaan masafo ah 3 fuudh intii suurtagal ah (tallaabooyin cad oo lagu baranayo masaafada la isku jirsanayo marka ayna suurtagal ahayn);
- Waxaa la dhigay fasal kasta hawo-nadiifiyaha HEPA (PPS waxay sidoo kale kor u qaaday dhammaan hawo-sifeeyaasha isku xiran ee wada gaara dhismaha heerarka MERV 13 dugsiyada oo dhan);
- Iyada oo ardayda PPS laga si bilaash looga taageerayo baaritaanka xanuunka COVID-19;
- Iyo in badan oo kale...

Waxaan aaminsanahay in heshiiskani aan la gaarnay Ururada Macallimiinta Portland (PAT) uu si adag u xaqiijinayo tallaabooyinkeena lakabyada nabadgelayada iyo caafimaadka, kuwaasi oo inoo oggolaanayo inaan kor u qaadno waayo-aragnimada waxbarashada ardaydeenu ku qaadanayaan fasalka dhexdooda. Waxaan rajeyneynaa waqtigan ama ka hor bisha Sebtember 14keeda, xubnaha PAT iyo Golaha Waxbarashada PPS ay labaduba tixgalin doonaan sidii ay ugu codeyn lahaayeen in heshiiskani noqdo mid dhaqangala.

Wararkii ugu Dambeeyey Xaalada Tallaalka Shaqaalaha

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan idinla wadaagno in 94% dhammaan shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland ay si buuxda uga tallaalan yihiin xanuunka COVID-19.* Marka la gaaro bisha Oktoober 18, 2021 dhammaan shaqaalaha PPS waxaa looga baahan yahay inay ka tallaalan yihiin xanuunka COVID-19.

Waxaan ku soo xirayaa qoraalkan, waxaan rabnaa inaan **idiin** mahadcelino haddii aad tihiiin bulshadayadii dugsiyada. Waxaan dhammaanteen u baahanahay inaan ka qeybqaadan doono inaan sameyno qeybta inagu soo hagaagtay sida (inaan xirano maaskaradeena, inaan dhaqno

gacmaheena, inaan masaafad isku jirsano, iyo inaan qaadano tallaalka marka aynu u qalano inaan qaadano), waa inaan ilaalinaa nabadgelyada nafteena, ardayda fasalada aan wadaagno, asxaabteena, iyo bulshooyinka dugsiyadeena.

Waad mahadsan tihiin. Waxaan is arki doonaa berito.

Jonathan Garcia
Chief of Staff

Sharon Reese
Chief of Human Resources

*Shaqaalaha PPS 9.5% waa la hubiyey.